

KIT – Qalabka is qiimaynta aqoonta luqadda finishka

Waa maxay KIT ?

KIT waa qalab shaqo, kaasoo adiga oo khaashanaaya aad ku qiimayn karto aqoontaada luqadda finishka. Adiga ayaa is qiimaynaaya, sida aad ugu wanaagsan tahay:

- fahmida afka finishka ee lagu hadlaayo
- fahmida finishka la qoro
- aqoonta ku hadalka finishka
- aqoonta qorista finishka

KIT ma ahan imtixaan rasmi ah. Natiijada arrinkaan **looma isticmaali karo** codsiyada waxbarashada ama codsiyada dhalashada ama jinsiyadda.

Waa muhiim

- **Adiga samee is qiimaynta. Haddii uu qof kale uu kuu sameeyo, natiijada soo baxda ma ahan mid sax ah.**
- Qiimaynta ha ku qorin magac ama wax macluumaad shakhsiyadeed ah.
- Adeegga shaqo helitaanka cid kale uma diraayaan natiijadaada.
- Natiijada waxaa la keydinayaa muddo dhan 3 sano.

Maxay muhiim u tahay in la sameeyo qiimayntan?

- Waxaad ogaanaysaa heerka aqoontaada luqadda.
- Aqoontaada luqadeed waxaa ay ka caawinaysaa xafiiska adeegyada shaqo helitaanka in ay kugu hagaan adeegyada iyo waxbarashada kugu habboon.
- Waxaad ogaanaysaa xirfadaha ay tahay in aad sii horumariso.

Maxaad u baahan tahay si aad u sameeyso qiimeyntan?

- Telefoon casri ah (älypuhelin), tablet ama kombiyuutar
- Sammaacadaha dhagaha
- Makarafoon
- Meel deggan oo aan buuq lahayn (waxaad tagi kartaa tusaale ahaan maktabadda)

Qiiimayntu waxaa ay qaadanaysaa muddo dhan qiyaastii **20–60 daqiiqo**.

Maxaa dhacaya qiimaynta kaddib?

Waxaad heleysaa **qiimayn guud oo gaaban oo ku saabsan heerka aqoontaada luqadeed A1–B2**: biloow, dhexdhexaad, wanaagsan, aad u wanaagsan. Waxaa intaas dheer oo aad heleysaa **natiijo ka kooban afar qaybood**: hadalka, fahamka waxa la maqlo, qoraalka iyo fahamka waxa la akhriyo.

Khabiirka adeegyada shaqo helitaanka ayaa ku qoraaya natiijada xogtaada shaqo doonista qaybta suuqa shaqada ee Työmarkkinatori. **Natiijada waxaa la isticmaalayaa, marka lagugu hagaayo dhanka shaqada ama adeegyada kaa caawinaaya in aad shaqo hesho.**


KIT– Qalabka is qiimaynta aqoonta luqadda finishka

Hagista isticmaalka –Qiimayn sameeyaha

A) Bilowga qiimaynta



- Fur linkiga qiimaynta ee khabiirka adeegyada shaqo helitaanka uu kuu soo diray. <https://tinyurl.com/Espoo-KIT>
- **Fiiro gaar ah!** Si aad u samayso qiimaynta waa in aad akhriso, islamarkaana aad oggolaato **xeerarka ilaalinta xogta** (tietosuoja) iyo **shuruudaha isticmaalka** ee nidaamka.



- Geli (=qor) (**PIN-koodi**) oo ah **ereysireedka** laguu soo diray

Syötä PIN-koodi



5-numeroinen PIN-koodi

45083


Vahvista PIN-koodi

B) Samaynta qiimaynta


- Qiimayntu waxaa ay bilaaban kartaa marka aad ugu horraynta hubiso in makarafoonku shaqaynaayo. Bixi oggolaanshaha isticmaalka makarafoonka, kaddibna bilow duubista.



- Guji ama riix sawirka makarafoonka, oo ku hadal makarafoonka.



- Dhageyso duubista. Haddii tayada codku ay wanaagsan tahay, xaqiiji dhageysiga oo guji badhanka **Valmis aloittamaan** –oo macnaheedu yahay “diyaar u ah bilaabidda”.




Qiimayntu waxay ku bilaabanaysaa hawlo fudud oo bilow ah.


- Qiimayntu waxaa ay ku bilaabanaysaa hawlo fudud, kaddibna waa ay sii adkaanaysaa iyadoo ay ku xiran tahay jawaabahaaga. Qayb kasta oo xirfad ah (dhageysi, hadal, akhris iyo qoraal) si gaar ah ayaa loo qiimaynayaa.
- Si deggan uga jawaab, hawluhu waa ay sii adkaanayaan marka qiimayntu ay sii socoto.
- Markaad leedahay **hawl hadal ah, xasuusnow in aad hadasho ugu yaraan 30 ilbiriqsi.**
 - ▶ Hadba inta badan ee aad hadasho, ayaa nidaamku si fiican u aqoonsanayaa jawaabtaada.

Bixinta aragticelinta/ xaaladaha dhibaatooyinka:

Haddii ay ku haystaan dhibaatooyin farsamo ama aadan hore u sii socon karin, riix badhanka **“Ilmoita”** oo macanaheedu yahay **(Soo sheeg)**. Dooro nooca dhibaata ku haysata, qor sharraxaad gaaban, kaddibna riix badhanka **“Lähetä ilmoitus”** oo macanaheedu yahay **(Dir ogeysiinta)**.




- Marka aad dirto ogeysiinta ku saabsan dhibaata farsamo, nidaamku islamarkiiba wuxuu ku siinayaa su'aal cusub. Kaddib waxaad sii wadan kartaa qiimaynta.
- **Badhanka ay ku qoran tahay OHJE (hagis) – hagista hawsha:** Hawl walba waxaa ay leedahay hagisteeda u gaarka ah. Waxaad arki kartaa hagista marka aad riixdo geeska hoose ee bidix ee shaashadda **sinistä Ohje-painiketta (badhanka hagista ee buluugga ah)**.




C) Dib u celinta qiimaynta iyo natiijoyinka.

- Marka qiimayntu ay dhammaato, waxaa kuu furmaaya **tulossivu (bogga natiijada)**. Boggaas waxa aad ka arki doontaa **qoraal kooban** oo ku saabsan qiimaynta iyo **natiijoyinka** **qaybaha kala duwan ee aqoonta luqadda**.



Dib u sameynta qiimaynta

- Haddii aad doonayso in aad qiimaynta samayso markale, riix badhanka **Tee uudelleen – painiketta** oo ah **“markale samee qiimaynta**. Waxa aad qiimaynta markale samayn kartaa **hal mar oo keliya** kahor inta aadan dirin natiijada



- **Fiiro gaar ah!** Ha riixin badhanka **Lähetä tulokset - (Dir natiijoyinka)** illaa aad hubto in aad rabto in aad kaydiso natiijada. Qiimaynta markale lama samayn karo, kaddib marka natiijada la diro.

Kaydinta / dirista natiijada qiimaynta

- Riix badhanka **Lähetä tulokset**-oo ah **dir natiijoyinka**.
- Natiijada qiimaynta waxaa lagu kaydinayaa nidaamka, waxaana loo gudbinayaa khabiirka adeegyada shaqo helitaanka.
- Daaqadda ka furmaysa shaashadda waxaad ka arki doontaa linkiga **tulossivun linki** oo ah **bogga natiijada**.
- Natiijada waxaad ku dirsan kartaa iimaylkaaga, marka aad ku qorto iimaylkaaga sanduuqa loogu talaggalay iimeylka, oo aad gujiso badhanka **Lähetä sähköposti** –dir iimeylka.

